



JAMHUURIYADA FEDERAALKA SOOMAALIYA
WASAARADDA WAXBARASHADA, HIDDAHA IYO TACLIINTA SARE JFS

Is-afgaradka Wasaaradaha Waxbarashada ee Dowladda Federaalka, Dowladaha Xubnaha
ka ah Federaalka iyo Maamulka Gobolka Banaadir

Luulyo 14, 2021

Arar


Shir ay isugu yimaadeen Wasaaradaha Waxbarashada dawladda federalka, Wasaaradaha waxbarashada dowladaha xubnaha ka ah dawlada federalka iyo Maamulka Gobolka Banaadir ayaa ka qabsoomay Caasimadda Garoowe ee Dawladda Puntland. Maanta oo taariikhdu ku beegan tahay 14/07/2021, waxaa si rasmi ah loogu yagleelay golaha wadatashiga iyo hormarinta waxbarashada Soomaaliya. Golaha waxaa ku mideysan wasaaradda waxbarashada, Hiddaha iyo Tacliinta Sare ee Dawladda Federaalka, Wasaaradaha Waxbarashada Dowladaha Xubnaha ka ah Dawladda Federaalka iyo Maamulka Gobolka Banaadir.

1. Golaha iskaashiga iyo wadatashiga Waxbarashada.

Golaha Wadatashigu waxa uu iska kaashan doonaa arrimaha Waxbarashada dalka. Sidoo kale, waxa uu isku xirayaa dedaallada hormarinta waxbarashada, xalna u raadinayaa caqabadaha soo noqnoqda ee la xiriira maamulka waxbarashada dalka.

Ujeeddooyinka Golaha loo yagleelay waxaa ka mid ah:

- Abuuridda jawi iskaashi oo lagu diyaarinayo ama dib loogu eegayo, laguna fulinayo sharciyada, xeerarka, istaraatiijiyadaha iyo halbeegyada guud ee lagu hormarinayo waxbarashada dalka;
- Diyaarinta aragtida waxbarashada dalka oo lagu abuurayo madal la isku dhaafsado khibradaha iyo aqoonta maamulidda waxbarashada.



AAET

- ii. Diyaarinta aragtida waxbarashada dalka oo lagu abuurayo madal la isku dhaafsado khibradaha iyo aqoonta maamulidda waxbarashada.

Goluhu waxa uu yeelanayaa guddi hoggaamineed oo heer wasiirro iyo maamulka gobolka Banaadir ah iyo guddi fulineed oo heer agaasimeyaal guud ah. Kulammada goluhu waxa ay noqonayaan saddexdii biloodba hal mar. Kulammadaas oo lagu muddeyn doono qorshe-hawleedka golaha. Goobta kulammada shirka goluhu waxay noqonaysaa meerto. Midka ugu horreeyana waxaa lagu qaban doonaa Kismaayo, magaalo-madaxda kumeel-gaarka ah ee Dawlad Goboleedka Jubbaland.

Goluhu waxaa uu yeelan doonaa mas'uuliyad shaqo oo lagu hormarinayo waxbarashada dalka, waxaana diyaarin doona guddi farsamo oo ka kooban agaasimayaasha Guud waxbarashada.


2. Midaynta qolfoofka Manaahijta.

Dood iyo falanqayn dheer kadib, waxaa lagu heshiiyey arrimaha soo socota:

1. In JFS ay yeelato Qalfoof Manhaj (Curriculum Framework) oo la wada dejiyey ayadoo la is waafajinayo qalfoofyada manaahijta ee hadda jira (kan Puntland iyo kan W. Waxbarashada Heer Federal).
2. In la yagleelo Guddi shaqo (Task Force) oo ka kooban xeeldheerayaal ka shaqeeya samaynta qalfoofka la wada dejiyey ee waxbarashada dalka.
3. Tirada guddigu wuxuu noqon doonaa 7 xubnood oo matalaya Wasaaradda Waxbarashada heer federal, Shanta (5) dowladood ee xubnaha ka ah DFS iyo Gobolka Banaadir).
4. Waxaa Guddiga shaqada loo samayn doonaa qeexid mas'uuliyadeed iyo shaqo (Terms of references) waxaana la isla gartay in ay howshaas lagu qabto 7 maalmood ah (laga bilaabo maalinta la saxiixo isafgaradkan).

Hawshan waxaa soo diyaarinaya xubnaha hoos magacyadoodu ku xusan yihiin:

1. Dr. Cabdullahi Cumar
2. Dr. Cali Cabdullahi Warsame
3. Dr. Siciid Faahiye
4. Ustaad Maxamed Cabdulqaadir
5. Marka la dhammeeyo Qeexidda mas'uuliyadda iyo shaqo ee Guddi Howleedka waxaa loo gudbin doonaa Wasiirrada iyo Agaasimayaasha Guud ee wasaaradaha heer federal, heer Dowladaha Xubnaha ka ah iyo Maamulka Gobolka Banaadir si ay dib ugu eegaan,



Atch

isla markaana u ansixiyaan. Guddi hawleedka qalfoofka manhajka dalku wuxuu ku soo dhammaystirayaa hawsha loo igmaday muddo 30 maalmood ah.

6. Shirka soo socda ee guddi hawleedka waxaa lagu qabanayaa magaalada Kismayo, Jubaland halkaas oo lagu soo bandhigi doono shaqada guddi hawleedka qalfoofka manhajka dalka laguna ansixin doono. Shirka waxaa ka soo qaybgalaya madaxda sare ee wasaaradaha waxbarashada iyo Maamulka Gobolka Banaadir.

3. Imtixaanaadka iyo Shahaadada.

B. Imtixaanaadka

1. Waxaa lasoo jeediyey in la dhiso guddi imtixaan oo madaxbannaan xubnihiisuna ka kooban yihiin 7 xubnood, oo ka kala imaanaya dawladda federaalka, dawladdaha xubnaha ka ah iyo Maamulka Gobolka Banaadir.
2. Dawladdaha xubnaha ka ah dawladda faderaalka ah iyo Maamulka Gobolka Banaadir way u madax bannaan yihiin uruurinta xogta, dejinta, daabicidda, qaadista, maalgelinta iyo lafaguridda imtixaanka iyo shaacintiisa. Guddigu imtixaanaadku wuxuu goobjoog ka noqonayaa arrimahan kor qodobkan ku xusan.
3. Guddigu waxa uu yeelanayaa tixraac masuuliyad shaqo (TOR) oo qeexaya muddo xileedkiisa iyo faahfaahinta waajibaadkiisa shaqo.
4. Guddiga Imtixaanaadka ayaa u xilsaaran halbeegyada, qiimeynta iyo kormeerka imtixaanka.
5. Guddigu waxa uu soosaarayaa warbixin dhammeystiran oo ka kooban dhammaan imtixaanaadka ka qabsoomay dalka.
6. Guddiga Imtixaanaadka ayaa u xilsaaran uqareemidda dhaqaalaha imtixaanka
7. Guddiga Imtixaanaadka ayaa goobjoog ka noqonaya shaacinta imtixaanka Dawladdaha xubnaha ka ah dawladda federaalka iyo Maamulka Gobolka Banaadir.

T. Shahaadooyinka:

1. Guddiga ayaa leh masuulna ka ah shahaadada iyo badqabkeeda
2. Shahaadooyinka waxaa lagu bixin doonaa qaabka mareegta danabeysan (online);
3. Hubinta xogta shahaadooyinka waxaa u xilsaaran guddiga



[Handwritten signature]

AAH

4. Shahaadada dugsiga sare waxaa laga bixinayaa xarumaha Dawladaha xubnaha ka ah Dawladda Federaalka iyo Maamulka Gobolka Banaadir.

J. Diyaarinta masuuliyadda shaqo

Mas'uuliyadda shaqo ee guddiga imtixaanaadka waxaa diyaarin doona guddi-hawleedkii hore ee loo igmadey yagleelidda guddiga manhajka.







Madasha iyo taariikhda dhisidda guddiga waxaa lagu beegi waxkhtiga dhisidda guddiga manhajka.



M.D

AAH

Saxiixayaasha

M/ne, Xildhibaan, Cabdullaahi Abukar Xaaji	M/ne, Cabdullahi Maxamed Xasan
Wasiirka, Wasaaradda Waxbarashada, Hiddaha & Tacliinta Sare ee Dawladda Federaalka Soomaaliya	Wasiirka, Wasaaradda Waxbarashada & Tacliinta Sare ee Puntland, Soomaaliya
Saxiix: 	Saxiix: 
M/ne, Muktaar Kaamil Kuley	M/ne, Maxamed Xaashi Dhoorre
Wasiirka ku-xigeenka, Wasaaradda Waxbarashada Jubbaland, Soomaaliya	Wasiirka, Wasaaradda Waxbarashada, Hiddaha iyo Tacliinta Sare ee Galmudug, Soomaaliya
Saxiix: 	Saxiix: 
M/ne, Dr. Cabdullaahi Abukar Xuseen	M/ne, Dr. Maxamed Yuusuf Xasan
Wasiirka, Wasaaradda Waxbarashada iyo Tacliinta Sare Hirshabeelle, Soomaaliya	Wasiirka, Wasaaradda Waxbarashada, Hiddaha iyo Tacliinta Sare ee Koonfur Galbeed, Soomaaliya
Saxiix: 	Saxiix: 
Marwo, Basma Caamir Axmed	
Guddoomiye ku-xigeenka Arrimaha Bulshada Gobolka Banaadir	
Saxiix: 